بِسْمِ اللهِ الرَّحْمٰنِ الرَّحِيْمِ

# QORSHIHII MADOOBAA

# DUULAANKA MASKAXDA

## Qeybta 3

ASMO KHALID

**2024**

Schrijver: Asmo Khalid

Coverontwerp: Asmo Khalid

ISBN: 9789403748276

❖

Qorshihii madoobaay.

Waa qorshe madoow.

Ka madoow dhuxusha.

Xumaan badan.

Waa qorshe madoow.

Qorshe sababay inay dad badan dhintaan.

Dhiig badan ayaa dartiisa loo daadiyay.

Umad badan ayaa aakhiro loo diray.

Dad badan ayaa dhulalkoodii looga xoogay.

Dad badan ayaa banaanka la dhigay.

Qorshahaas wax yaalaha uu sababay waxaa ka mid ah.

Inay dad badan daraadiisa ay u waayeen noloshooda.

Maalkooda.

Dhulkooda.

Xornimadooda.

Dadnimadooda.

Rajadoodii.

Nolol jaceylkii.

Iyo hamigooda.

❖

Qorshahaan ayaa dadka labo qeyb u kala bixiyay.

Koox quusata.

Oo wax walba ku qanacda.

Iyo koox kale.

Kooxdaasoo dagaalanta.

U halgamta xornimadooda.

Qorshahaan ayaa ah qorshe aan maanta ku nool nahay.

Waa system.

Waa system ka ay dunida ku maamulaan reer galbeedka.

Waa systemkii ay ku heleen awooda dunida.

Isla qorshihii un waaye.

Waa hal qorshe.

Hal qorshe.

Halkii qorshe ayeey dunida oo dhan u wada isticmaalaan.

Ilaa iyo maanta ayeey isticmaalaan.

Waligood ma isku dayayaan inay wax kale fikiraan, inta uu qorshahaan u shaqeynaayo.

Qorshahaan ayaa ah qiyaamo.

Qiyaano qaran.

Waa mid siyaasad wato.

Waxaa qorshahaan ka dambeeyeen dad.

Dad shayaadiinta caabuda.

Dad xumaan badan.

Dad la damacsan dunidaan xumaan.

Waa isla dadkii un.

Dadka dunidaan maamulo.

Dadka ka dambeeya dalkeena hooyo inuu dhulka galo.

Isla qorshihii ayeey umad walba u isticmaalaan.

Qorshahaan oo dad badan u diray.

Halka loo badan yahay.

Aakhiro.

❖

Dadkaan waxa ugu weyn ee doonayaan ayaa ah inay helaan dad aan fikirin. Dad wax walba aamina. Dad shaqeeya ayeey rabaan. Waxay mar walba doonayaan inay helaan dad dunida un bursado. Oo aakhiro dan ka laheyn.

Shey walba aad maanta dunida ku aragtid, ama wax walba oo cusub. Dhamaantooda qorshe weyn ayaa laga damacsan yahay.

Qorshahaas oo ah, umada oo dhan inay dunidaan jeclaadaan. Dadkii oo aduunyo un u shaqeeya. Waxay doonayaan ayaa ah, inay helaan dad qaflo ku sugan oo aakhiro hilmaamsan.

Aduunyo jaceyl ayeey ku beerayaan quluubta umada. Taasi oo awood u siineysa inay badeecadahooda iibiyaan.

Dadkii ayeey maskaxda ka waalayaan. Maalin walba wax baa soo baxo. Maalin walbo wax cusub ayaa imaado.

Umada marba wax beey ku kacdaa, wax beey ka tagtaa.

Wax baa cusub, wax baa duugooba. Maalin walba aduunyo un ayaan bursanaa.

Dadkii ayaa lagu beeray tartan. Iyagoo xoolo badsi, aduunyo iyo maal isku faanaayo.

Waxay dadka usoo saareen aalado. Aalado ka caawiya qorshahooda.

Baraha bulshada ayaa jirto. Wax walba oo cusub ayaad halkaas kala socon kartaa.

Waxay kaloo soo saareyn aalado kale oo aad iyo aad u badan.

Aalad walba ay iyaga soo saaraan, qorshe weyn ayeey ka damacsan yihiin. Waxba ma iska soo saaraan.

Baraha bulshada waxaa laga isticmaalaa dunida oo dhan. Taasi oo iyaga awood u siineysa, inay bulshooyin badan halkaas ka ugaarsadaan.

Waxay raadsadaan dad. Dad badan oo wax xayeesiiya. Dadkaas ayaa mar waliba umada la wadaaga wax yaalaha cusub.

Taasi oo ku abuureysa quluubta dadka aduunyo jaceyl. Waxayna ka qaadeysaa ruuxa qanaacada.

Qofkii ayaa ugu dambeyn gaaraayo heer uu nimcadiisa arkin. Suu umada kale nimcadooda u arkaayay, iyo suu maalin walba shey cusub u arkaayo.

Waa sababta keentay maanta dad badan inay jiraan oo ku nool nolol ka fog waxay awoodaan.

Waxaa jiro dad badan oo deen u qaato say shey u helaan. Iyagoo damacsan inay baraha bulshada waxaas saaraan, si ay umada ula wadaagaan nimcadaas cusub ay heleen.

Umadii ayaa la geliyay tartan. Tartan aan la arkin. Xoolo iyo aduunyo badsi ayaa loo wada socdaa.

Raga waxaan ka dambeeyo iyaga dan weyn ayaa arintaan ugu jirto. Ileen waa ganacsato. Waa dad lacagtooda un fiirsada.

Marna maka fikiraan halista ay bulshada kusoo ziyaadinayaan. Waxa kaliya u daran ayaa ah lacagta ay ka helayaan halkaas.

❖

Dadkii quluubtooda oo cabsi lagu abuuro. Umada oo dhan wax beey ka cabsataa. Waxay ka cabsato cid aragta ayaan jirin.

Qof walbo meel baa laga heystaa. Cabsi un ayaa heyso. Cabsidaas oo la sii tixiraaci karin.

Meesha ay cabsidaas ka imaaday, iyo waxa sababay cabsidaas, inta garan karto ayaa iska yar.

Bulshada ayeey had iyo goor ku abuuraan cabsi. Cabsiyo kala duwan.

Cabsida ugu weyn ee maanta dadka heysato ayaa ah, inay ka cabsadaan nolosha.

Waxaad arkeysaa qof ay dhibaato heysato. Wuxuu ka cabsanayaa inuu dhibaatadaan xalkeeda la imaado.

Umadii ayaa wada cabsaneysa. Cabsidaas ayaa badanaa abaarta mustaqbalka.

Dad badan ayaa jiraan oo ka cabsada inay guursadaan, wax dhalaan, ay shaqeystaan, ay guuraan, nolol kale inay bilaabaan ayeey ka cabsadaan.

Dadkii ayaa booskooda lagu haayaa. Cabsi ayaa had iyo jeer lagu abuuraa. Taasi oo keeneyso in ugu dambeyn la waayo dad dhaqaaqa.

Dad hadla. Dad xaqooda u dooda. Dad wax kala doorta. Dad wax kala shaandheyn kara.

Dadkii ayaa hal laga wada dhigayaa. Si hadhow, dhamaantooda hal meel looga wada amro.

Waxay rabaan ayaa ah inay sameeyaan sharci ah.

Hal dad. Hal amar.

Umada oo dhan halkaas amar inay wada qaataan ayeey rabaan.

Si ay sidaas u helaan, marka hore waa inay helaan dad la amri karo. Oo wax walba adeeca. Dadkii ayeey ka dhigayaan sidey iyaga rabaan.

Dadka qorshahaan ka dambeeyo ayaa ah, dad u socda un lacag, maamul, kursi iyo awood.

Wax kale ay doonayaan ayaan jirin.

Wax walba ay ku qaadato way sameenayaan, si ay u gaaraan danahooda u gaarka ah.

Haba noqotee inay umad badan dhulka la simaan. Say hore u sameeyeen oo kale, ilaa iyo maanta ay sameeyaan.

Qorshahooda cusub oo ah.

Hal nin.

Hal sharci.

Qorshahaas dhaqan gelintiisa ayeey ku jiraan. Nasiib xumo waxaan aragnaa inay u dhow yihiin inay qorshahooda ku guuleystaan.

Hal nin: oo u dhiganta, umada oo dhan inay noqdaan sida hal qof oo kale. Oo hal amar ayaa dhamaantooda ku shaqeynaayo.

Waa waxa maanta dunida ka socdo oo kale. Bulshooyinka dunida ku nool, intooda badan waxaa laga wada amraa baraha bulshada.

Media. Wixii internetka laga sheego ayeey aaminaan.

Waxaad u maleysaa dadkii in maskaxda laga tirtiray. Qof fikiro ayaan jirin.

Umadaan ayaa noqotay koox ah, inay u jeestaan dhankii loo jeediyo.

Waa dad hogaansan. Oo la amro. Dhankii loo leexiyo ayeey u leexdaan.

Dadkii ayeey ka dhaadhacsiiyeen in aysan waxba is weydiinin.

Umada ayaa fikirin. Waxaad u maleysaa in lagu wada dhahay.

''Ha fikirina. Anagaa idiin fikireyno. Waxaan idiin sheegno un adeeca.''

Waxay heleen bulsho wada ah. Inay wax maqlaan. Ayna ku dhaqaaqaan, ay shey walba adeecaan. Iyagoo marna is weydiinin.

''Waxaan ma saxbaa, mise waa khalad?''

❖

Iskool aad.

Wax baro.

4 sano dugsi hoose dhigo.

4 sano dugsi dhexe dhigo.

4 sano dugsi sare dhigo.

4 sano jaamacad dhigo.

16 sano oo noloshaada ka mid ah ayaad wax soo baraneysay. Waxa kaliya aad baratay ayaa ah, hal qibrad. Hal qibrad aad quudkaaga ku raadisid.

Ka badan faro maku heysid.

Cimrigaaga in badan oo ka mid ah iskool ayaad soo dhiganeysay. 12 sano ugu horeyso ee wax barashadaada waxba maka heysid.

Waxaad soo dhameysay dugsi sare. Shahaado ayaad ka wadataa. Waxaad tahay qof 12 sano oo noloshiisa ka mid ah wax soo baranaayay.

Subax walbo iskool kaas ayaad aadeysay.

Ma ii sheegi kartaa waxaad ka faaiday?

Waxa kaliya aad noloshaada uga baahan doonto ayaa ah.

Aqrinta. Qoraalka iyo xisaabta.

Hal luuqad aad si fiican ugu hadli kartid masoo baranin. Wax yar oo qaraab ah ayaad ka wadataa.

Waxaad soo dhiganeysay iskool 12 sano. Bil walbo lacag ayaad dhiibeysay.

Ii sheeg.

Maxaad ka faaiday?

Maxaad ka wadataa?

Cilmi aduunyo ku anfacaayo miyaad leedahay?

Mise cilmi janada ku geyn karo?

Ma leedahay cilmi aad umada wax ugu qaban karto?

Mise waxaad soo baratay cilmi aad naftaada ku badbaadin kartid?

Nasiib xumo.

Su'aalahaas jawaabtooda waan wada ognahay. Waa maya.

MAYA.

Intaas oo wax maka wadatid.

12 sano ayaad wax soo baraneysay. Waxa kaliya aad ka wadatid ayaa ah warqad yar. Ay ku magacaabaan ''shahaado''.

Warqadaas ayaa ah furaha aad ku geli laheyd irida mustaqbalkaaga.

12 sano wax barasho aan damaanin. Wali waxba maka wadatid.

Waxa kaliya aad ka wadatid ood ka heshay ayaa ah warqad.

Shahaadadaas ayaa ah mid aad jaamacada ku gali kartid.

Markaas kadib ayaad afar sano wax sii baraneysaa. Afartaas sano markaad dhameysid kadib ayaad leedahay khibrad.

Hal khibrad.

Hal wax ayaad baratay.

Hal sheey, aad naftaada ku badbaadin kartid.

Halkaas shey ayaad ku shaqeysaneysaa saad reerkaaga, naftaada iyo waalidkaaga wax ugu tartid.

System kaan ma yahay mid qariban mise ma ahan?

Naftaada weydii.

12 sano aad wax soo baraneysay. Waxay kuu dhigayeen intooda badan waa shey aan loo baahneen. Aadan waligaa isticmaali doonin.

Waqtigaaga ayaa lagaa dhuminayaa. Noloshaada ayeey ku ciyaarayaan. Lacag ayeey kaa qaadanayaan.

12 sano aad wax soo baraneysay. Ilaa dugsi sare. Waxaad soo baratay marka loo bar bardhigo waxaad nolosha ku isticmaaleysid aad u baahan doontid.

Barashadeeda waxay kugu qaadan kartaa ugu dambeyn hal sano. 11 sano oo noloshaada ka mid ah wey soo beerdareeyeen.

Waxa kaliya aad ka heshay ayaa ah.

Wax aqrinta.

Wax qorida.

Xisaabta.

Luuqad yar oo kuu bilaaban.

Intaas ayaad noloshaada ugu baahnaan doontaa. Ka badan maka isticmaali doontid.

12 sano oo caruurteena noloshooda ka mid ah ayeey sidaan ugu ciyaaraan.

System kaan waa system aan ku nool nahay maanta. Dunida oo dhan ayuu ka jiraa.

Qof ka baxsan karta ayaan jirin.

Qof walba ayaa ku qasban inuu system kaan qaato. Hadii kale wado aad ku heshid waxaad dooneysid ayaa kugu adkaan doonto. Oo wadadaas ayeey adkeeyeen, ama ay dhagaxyo dhigeen.

Dadka ayaa had iyo goor ku qasban inay system kaan soo maraan.

System kaan hadaadan qaadanin, intooda badan nolosha dhib ayeey noqoneysaa.

Ileen wax kasii liito ayaad heleysaa.

Dadkaan ayaa dunida maamulo.

Say umada u adoonsadaan waxay go'aan ku gaaren. Caruurta inta ay yar yihiin inay maskaxda ka qabsadaan.

Ma ogtahay ilmaha yar, marka uu hadalka barto kadib inuu yahay cajalad. Waa cajalad wax duubta.

Wixii maskaxdiisa lagu shubo ayuu qaadanayaa.

Nasiib xumo. Waa xiliga ay ina ugaarsadaan.

Ilmahaas yar oo cajalada ah, maskaxdaas cuseebta ah uu Ilaahay swt siiyay. Iyaga ayaa kaga hormara waalidkii dhalay.

Waxaa kaaga sii daran inaan system kaan dhamaanteena aaminnay. Waalidiintii iyagoo qanacsan ayeey caruurtooda geynayaan iskoolada. Iyagoo diyaar u ah in cunugaas noloshiisa halkaas lagu burburiyo.

Dadkeena iyo umada dunida ku nool oo dhan ayeey ka dhaadhacsiiyeen. Iskoolka waa muhiim. Waa shey aad caruurtaada ku badbaadin kartid.

Iskoolada waa muhiim. Laakin cashirada ay bixinayaan ayaa ah, kuwo aan muhiim aheyn intooda badan. Waa cashiro, manhaj ay gaalo inoo soo qoreen, iyagaa inoo soo dejiyeen. Say anaga maskaxdeena u adoonsadaan.

Markaasaa, waalid walba ilmahiisa ayuu halkaas geystaa. Asagoo doonaya cunugaan yar uu dhalay inuu badbaadiyo.

Haba noqotee 16 sano inuu bil walba lacagta iskoolka dhiibo.

Nolosha aan maanta ku nool nahay ayaa tan ah.

Iyaga ayaa jid inoo jeexay. Jidkaas ayaan raacnaa. Waan ku dhaqannaa. Waana qaadanaa. Anagoo aaminsan wadadaan inay tahay wado wanaagsan.

Sideed kalsoonidaas buuxdo ugu qabi kartaa qof gaal ah?

Gaal kuu arka cadow.

❖

Maskaxdeena ayeey ka buuxiyaan waxaan faaido laheyn. Caruurta maskaxdooda ayeey fadhiisiyaan.

Cunugii hal abuurka lahaay ee fikradaha badnaay. Laba sano marka uu iskool ka dhigto kadib waxaad arkeysaa cunugaan oo damsan.

Fikrad kale maka maqleysid.

Wuxuu kugu dhahaayo ayaa ah, ''wadada guusha inay tahay in wax la adeeco, iskool la aado, wax un la barto.''

Maskaxda inta ay yar tahay ayeey abaaraan. Xiligaas ayeey ka faaideystaan.

Dunida oo dhan waa isku mid. meeshaad rabtid ka joog. System kaan ayaan ku wada nool nahay. Qof walba ayaa ku nool.

Waa sababta keentay marka aan maqalno qisooyinka saxaabada inaan la yaabno.

Waxaan is dhahnaa. ''Bani Aadam anaga camal miyeey ahaayeen?''

Bani Aadam anaga camal ayeey ahaayeen. Isku abuur ayaa nahay. Isku maskax ayaa nala wada siiyay.

Tooda wey isticmaaleen. Teena iyadoo yar ayaa la burburiyay. Laakin wali wey inagu jirtaa.

Inaan ogaano un ayaa loo baahan yahay. Cadowgeena kii ah, iyo waxa uu naga damacsan yahay.

Saxaabada wax yaalaha ay qaban jireen ayaa la yaabnaa.

Gaar ahaan xifdiskooda. Markaan maqalno halaha shey ay xifdisanaayeen waan la yaabnaa.

Arin cajiib ah ayeey inala noqotaa.

Arintaas cajiib ma ahan.

Bani Aadamka Ilaahay swt ayaa u abuuray qaab cajiib ah.

Maskaxdaan uu na siiyay ayaa wax badan qaadi karto.

Saxaabada maskaxdooda waxa ay qaadi kartay, maskaxdeena way qaadi kartaa.

Waxa kaliya aan ku kala duwan nahay ayaa ah, inay ahaayeen saxaabada dad maskaxdooda iyo caqligooda isticmaalay. Halka aan anaga teena isticmaalin.

Dad kale ayaa maskaxdooda inoo isticmaasho. Iyaga ayaa inoo fikiraan.

Iyaga ayaa shuruucda inoo dejiyaan.

Iyaga ayaa wax inoo soo saaraan. Halka aan anaga wax walbo ka adeecno.

Dad wada macaamiil ayaa nahay. Iyaga ayeey lacagta oo dhan u tagtaa.

Wax beey inoo soo saaraan. Waxay doonto ha ahaato. Anaga waan iibsanaa.

Lacagaheena ayaan ku bixinaa. Iyaga ayaa inaga taajiro.

Waxaad u maleysaa. In ay nagu dhaheen. ‘’Ha fikirina, iska fadhiya, iska nasta, anaga ayaa idiin fikireyna.’’

Waa arin laga yaabo.

Cimrigeena ayaan wax baranaa. Waxaan baranay ayaan ogeyn.

War mala waayay qof fikira? Oo arka arinkaan in uu qiyaamo yahay. Qiyaamo adiga lacag lagaaga guranaayo. Cimrigaaga lagu beerdareenaayo.

Sheydaanka qorshahiisa ayaa u fulaayo.

Aakhiro ma u shaqeysano. Aduunyo bursigeeda ayaa waqtigeena oo dhan qaadatay.

12 sano waxaad soo baraneysay markii leysku dardaro. Waxaa hubaal ah, inaad waxaas oo dhan hal sano in ka yar aad ku baran kartay.

Hadii aan ula jeedo kale laga laheyn. Waad awooda. Qof walba ayaa awoodo.

Jirkeena Ilaahay swt woxoo u sameeyay qaab ah. Xubinka aan la isticmaalin inuu howl gabo.

Anagoo yar yar ayaa iskool nala geeyaa.

Maskaxdeena ma isticmaalno.

Waan aamusnaa. Waan dhageysanaa.

Kuraas ayaan ku fadhinaa.

Macalin ayaa sabuurada hor taagan.

Wuxuu inoo sheego ayaa maqalnaa.

Cashirkaas ayaa wada qornaa.

Waxaas ayaan ka shaqeynaa.

Maskaxdeena anagoo isticmaaleynin.

Hore ma isku weydiisay iskoolaadka wax yaalaha laga barto inay san aheyn in adiga wax lagu baro.

Ee waa wax adiga adoon kaa dhigaayo. Adoon wax walba adeeca, aamina oon fikirin ayeey kaa dhigayaan.

Si fiican ula fiirso.

Iskoolka cashir ayaa laguu dhigaa.

Cashirkaas wixii laguu dhigay un ayaad baraneysaa. Wax kale ma baraneysid. Cashirkaas waa inaad si fiican u qaadataa, u barataa, uga shaqeysaa.

Kadib. Su'aalaha lagaa weydiin doono, iyo cashirada aad ka shaqeeneysid dhamaantooda waxay ku saabsan yihiin cashirkii adiga laguu dhigay.

Tusaale ahaan. Waxaa lagu dhahay. ''sheygaan waa gaduud.''

Cashirkaan kasoo shaqeey ayaa lagu dhahay. Hadhow na imtixaan ayaad ka galeysaa. Oo imtixaan ayaa lagaa qaadayaa.

Su'aasha marka ay imaado oo lagu weydiiyo.

Goortii laguugu dhaho. ''Sheygaan waa kalaarkee? Noocuu ahaay?''

Jawaabta kaliya saxda ah oo lagaaga baahan yahay inaad bixisid ayaa ah, inaad ku jawaabtid.

’’Sheygaan waa gaduud.’’

Ka badan maku jawaabeysid.

Kalar kale hadii aad sheegtid waa khalad. Imtixaankaas waad ku dhacday.

Su’aasha lagu weydiiyay. Jawaabta kaliya saxda ah ee leedahay ayaa ah, in sheygaas uu gaduud yahay.

Inta nooc iyo kalaro aduunka taalo oo dhan hadii aad sheegtid, dhamaantooda waa khalad.

Halka shey saxda ah ayaa ah in sheygaan uu yahay mid gaduud ah.

See ku ogaatay in su’aasha saxda ah ay tahay gaduud?

Waxaad ku ogaatay cashirkii aad soo qaadatay. Cashirkaas ayaa lagaaga dhigay sheygaan inuu gaduud yahay.

Ii sheeg. Maskaxdaada miyaad isticmaashay?

Ma adaa fikiray?

Hal abuur miyaad la imaaday?

Waa maya.

Waxa kaliya lagaaga baahnaay ayaa aheyd, inaad xasuusatid kalarkaas nooca uu ahaay. Gaduud ayuu ahaay.

In sheygaas uu gaduud yahay hore ayaa laguugu sheegay. Adiga maadan arkin, mana fikirin. Waad maqashay, waana aamintay.

Waa marka aan ku dhahaayo. Waxay doonayaan inay helaan adoomo wax walba maqla, oo adeeca. Marna su'aal warsanin.

Wixii loo sheega un aamina. Oon marna ka shakinin. Marna ka fikirin. Marna is weydiinin.

Waa umad iyaga oo dhan wax maqasha. Waxaasna adeecda.

Waad u jeedaa. Waxay ku sameenayaan caruurta.

Ilmihii yaraay ayeey wax barayaan. Dadka waxa kaliya ay fiirinaayaan ayaa ah waxa uu baranaayo.

Ma ogo halista ka dambeysa oo ku duugan. Qorshaha laga damacsan yahay ayeysan fahamsaneen.

Cunugaan markii wax loo sheego. Uu waxaas un barto. Waxaas un uu sax yahay.

Waxa kaliya cunugaas lagaga baahan yahay ayaa ah inuu wax xasuusto oo xifdiyo un.

Cimrigiisa sidaas ayuu ku jirayaa.

Cunugaan ayaa marna maskaxdiisa isticmaaleynin. Ma fikiraayo.

Hadii uu fikiro, qeyliyo, hadlo ama uu wax kale sameeyo. Dhamaantooda waa khalad.

Waa la ciqaabayaa.

Waxa kaliya saxda ah, ayaa ah, inuu macalinka warkiisa maqlo, adeeco, uu dhageysto. Kadibna uu fuliyo waxa la amro. Asagoo marna fikirin waxna is weydiinin.

Gacmaheena ayaan adoomo ku sameeneynaa.

Ilmahaas yar waligiisa ma fikiraayo. Waxa kaliya uu sameynaayo ayaa ah, inuu wax un adeeco. Wax un barto, xifdiyo, ku dhaqaaqo. Aamino.

Sheygaas ayuu u arkaa inay wax fiixan yihiin.

Halka ay guusha ku jirto maskaxda.

Maskaxda iyo hab fikirkaaga in la kobciyo ood isticmaashid.

System kaan ayaa ah mid dunida oo dhan ka socda. Meel looga baxsado ayaa iska yar.

Dadkaan ayaa nagu dhahay. ‘’Wadada guusha waa tan. Ee raaca.’’

Waligaa ma aragtay qof jaamcad kasoo baxay. Shaqeeya oo taajiray? Oo dunida wax ka badalay.

Waa maya.

Waa la wada og yahay. Wadadaas inay tahay wadada shaqaalanimada. Qof baad u shaqeeneysaa. Mishaar ayaad qaadaneysaa. Laakin guul sare, maamul, lacag badan iyo saameyn iska iloow waaye.

Dadka badankooda ayaa noloshooda sidaan ku dhameysta. Waxaan la gaarin ayeey bursadaan.

Hadaan qaab kale u dhaho.

Waxaan jirin ayeey bursadaan.

Wey dhici kartaa, qof jaamacad kasoo baxay inuu taajir noqdo. Ama uu umada wax ka badalo. Laakin wadada uu soo bartay heerkaas maku gaarin.

Wado kale ayuu isticmaalay.

Tusaale ahaan. Hadii aad aragtid qof guri weyn dagan. Lacag badan heysto. Oo taajir ah.

Naftaada ma weydiineysid inuu qofkaan yahay qof jaamacad kasoo baxay.

Maya.

Waxaad is dhaheysaa. Qofkaan waa qof ganacsade ah, lacag ayuu dhaxlay, ama wax kale ayuu sameeyaa.

Laakin cid ku fikirta ayaan jirin, qofkaan inuu heerkaan ku gaaray. Wixii uu jaamacada kasoo bartay.

Qof walba ayaa tan og. Iyadoo sidaan ah hadane waan wada adeecnaa.

❖

Wax barashada waa muhiim. Wax barasho la'aanteeda qof aa nahay ayaan jirin.

Maalin walbo wax baan baranaa.

Laakin waxaan rabo inaad aragtid ayaa ah. Wax barashada wadada aad u qaadaneysid inaad iska fiirisid.

Wax waala baran karaa. Laakin dadkaan wadada ayeey inagu dheereynayaan.

Umadii ayeey aaminsiiyeen inaysan waxba baran karin.

Dadkii ayaa aaminay wax barashada inay adag tahay. Ay lacag joogto.

Laakin sidaas ma ahan.

Wax barashada waa mid fudud. Wadooyin badan ayaad wax u raaci kartaa.

Waxaa la arkay dad 30 maalin gudahooda Qur'aanka ku xifdiyay. Waa dad anaga xiligeena nool. Waa dad maanta inala nool.

Mig xasuusnoow.

Maskax Ilaahay swt woo ku siiyay. Inta aad masakaxdaas leedahay wax waad baran kartaa.

Qof aan maskax laheyn ma noolo. Maskaxda hadii ay mar shaqada joojiso waad dhimaneysaa. Masii noolaan laheyn.

Waxaad arkeysaa Somali badan oo ku dhahaayaan.

''Maskaxdeeda wey duqoowday. Intaad yar tahay un ayaad wax baran kartaa. Ani waan weynaaday.''

Waxaas wax la dhahaayo ma jiro.

Wax waad baran kartaa.

Waad awoodaa.

Waad kartaa.

''Maskax ma lihi, ma shaqeeneyso, da' ayaan ahay.''

Waa been.

Naftaada ayaad been u sheegeysaa.

Waxaa la arkay dad 60 jir ah, oo dugsi aaday say Qur'aanka Alle usoo bartaan. Mudo yar kadib ayeey Qur'aanka ku xifdiyaan. Kutubo kale ayeey u gudbaan.

Hadii uu go'aan jiro. Wado wey jirtaa.

Adiga waa inay kaa soo go'daa. Waa inaad diyaar u ahaataa in aad wax baratid.

Wax barasho waqti iyo da' maku xerno.

Naftaada ha liidin. Maskaxdaada waa mid shaqeysa. Wax qabad la imoow. Maanta isticmaal.

Waqtigii tagay haka fikirin. Maanta is badal la imoow waad kartaa.

Saad naftaada ugu dhaheysay, ''maskax ma lihi'' ayaad ugu dambeyn aamintay.

❖

Wax waad baran kartaa.

Waana awoodaa.

Wax qabad waad leedahay.

Beenta aad naftaada u sheegeysid iska dhaaf.

Qof aan wax qaban karin dunidaan ma joogo.

Qof walbo ayaa maskax la siiyay.

Sheydaan yuusan kaa faaideysanin.

❖

Hada ka hor ayaa waxaa arkay hooyo. Wiilkeeda ayaa imtixaanka ku dhacay.

Waxay aragtay wiilasha asaga la eg inay imtixaankii keeneen.

Dood dheer kadib waxay aragtay cunugaan inuu mar walbo ku dhahaayo, oona aaminay, inuusan waxba baran karin. Ay umada kale ka wax barasho badan yihiin.

Hooyadii ayaa aad iyo aad u carootay.

Markaas kadib ayeey cunugeeda ku dhahday, iyadoo zaaid u canaananeysa.

’’Cunugaan labo madax miyuu qabaa. Labo madax miyuu wadada la maraa. Sideed ku keeni weyday wuxuu asaga keenay? Maxaad u awoodi weyday?’’

Markaan maqlay iyadoo dhaheysa. ‘’Cunugaan labo madax miyuu leeyahay?’’

Qosolkeyga ayaan celin waayay. Waayo waa la yaab. Waana su’aal mudan in leys weydiiyo.

Dadkaan labo madax miyeey qabaan?

Laba maskax miyaa la siiyay?

Sideed wax u qbasan weyday adiga?

Sideed noloshaada wax uga badali weyday?

Maxaa diiday inaad naftaada wax u qabsatid?

Maxaad umada wax ugu soo ziyaadin weyday?

❖

Waa shey muhiim ah. Umada ayaa badanaa aaminto, ineysan waxba qabsan karin.

Dunidaan majiro qof aan wax qabsan karin.

Qof walba awood u gaar ah ayaa la siiyay. Xaaladaad doontid ku jir. Wax waad qabsan kartaa.

Qof aan wax qabsan karin ma jiro.

Yeysan been kuu sheegin.

Wax walba ha iska aaminin.

Wax walba aad maqashid, saxiix ma ahan.

Waad ogtahay inay jiraan dad badan oo iska hadla, iyagoo fikirin, hadalkooduna aan ka fiirsanin.

Wax waad qabsan kartaa.

Ee fadhiya ka kac.

Caajisnimo ayaa kuu geeneyso. Adigabo waad ogtahay. Ka badan ayaa kugu jirto.

Ilaahay swt awood la’aan maku dhigin.

Ee noloshaada wax ka badal.

Kac. Ee saan wax isku dhaam.

Cid kuu imaaneysa oo ku badbaadineysa ayaan jirin.

Wax aadan adiga naftaada siin karin, oodan u qaban karin. Haka sugin dad kale inay kuu qabtaan.

❖

Macalimiinta iskoolada cashirada ka dhigo. Ayaa aaminsan inay caruurta wax barayaan. Inay caruurta u diyaarinayaan mustaqbalka ayeey u maleeyaan.

Macalimiinta xitaa system kaan wax maka badali karaan. Manhajka wax barasho ee loo soo dajiyo ayeey isticmaalaan.

Buugaagta meesha taalo ayeey caruurta u dhigaan. Iyagoo wanaag la damacsan ilmahaas.

Manhajka wax barashada ee dunida u yaalo ayaa maanta sidaan ah.

Gaar ahaan kuwa Somalida. Dalkeena waxaan ku baranaa waxaan aduunyo iyo aakhiro faaido inoogu jirin. Cashiro badan ay caruurteena qaataan ayaa sidaas ah.

Faaidada kaliya ku jiro ayaa u leh dadkii system kaan dagsaday. Faaidadaas ay helayaan ayaa ah, inay helaan shacab wax walbo adeeca. Oon fikirin.

System kaan waa system dunida oo dhan looga dhaqmo. Dal walbo ayaa manhajkaan wax barashada raaco.

Dalalka qaarkood awood ay manhajkaas ku badalaan wali ma helin. Sida wadankeena oo kale.

Dalalka qaarkood wey ku qanacsan yihiin manhajkaas. Wuxuu awood buuxdo siinayaa dowlada. Dadkooda ayeey sii adoonsan karaan.

Sida dalalka hormaray oo kale. Dalalka reer galbeedka iyo wadamo badan oo Asia ka tirsan.

❖

System kaan ayaa ah system qofka xornimadiisa, caqligiisa, hal abuurkiisa, fikirkiisa iyo maskaxdiisa looga tiraayo.

Dadka ineysan fikirin aysan maskaxdooda isticmaalin ayuu sababayaa.

Maa gumeysi maskaxeysan.

Duulaanka ay maskaxdeena kusoo qaadeen waaye.

Mahajka wax barashada u dagsan, ayaa kaalin weyn ka qaato inay dunida maamulaan.

Waa sababta keentay dunida oo dhan inay reer galbeedka kor u fiiriso. Iyagoon kuu imaanin. Ayeey kor kaa maamulaan. Adigane waad adeecdaa.

Iyaga ayaa manhajkaan u daga dalalka. Dalalkaas ayaa shacabkooda u dhiga manhajkaan wax barasho.

Taasi oo keeneysa inay halkaas kasoo baxaan dad badan oo u adoonsan reer galbeedka. Xitaa hadii aysan waligooda kuu imaanin.

Mar walbo iyaga ayaad kor u fiirineysaa.

❖

Yaa og.

Manhajkaan cida keentay.

Halka uu ka imaaday.

Sababta uu awoodaan u yeeshtay?

Waa kuma qofka heerkaan gaarsiiyay?

Sidey ugu guuleysteen inay umada oo dhan man hajkaan ku wada dhaqmaan?

Waa system ay inoo dejiyeen.

Halka uu inaga soo galay. Iyo xiliga ay inoo keenen. Ilaahay swt ayaa og.